

# Xuquuqdaada markaad kireysanaysid: Xuquuqda Aadanaha ee Alberta

**Ma ogtahay? Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Alberta wuxuu ka hortagayaa takoorida ku saleysan da'da.**

**Takooridda da'da**

## **Ilaa Janaayo 1, 2018 laguma takoori karo iyada oo ku saleysan da'daada:**

- Ogeysiin kasta oo dadweynaha ah (sida xayeysiinta) markaad isku dayaysid inaad isticmaasho alaabada iyo adeegyada dad weynaha ee la heli karo
- markaad isku dayayso inaad hesho meel aad ku noolaato
- markaad isku dayayso inaad shaqo hesho
- markaad isku dayeyso inaad ku biirto urur shaqaale, urur shaqo-bixiye, ama urur xirfadeed

**Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta wuxuu qeexayaa da'da 18 jir ama ka weyn. Haddii aad tahay 18 jir ama ka weyn, laguma takoori karo iyada oo ku saleysan da'daada.**

## **Xayiraadaha da'da qaarkood ayaa weli la ogol yahay:**

- 1) Barnaamijyada (sida qiimo dhimista) kuwaas oo ka caawiya waayeelka ama Dhalinyarada
  - Waayeelka waxa laga wadaa 55 jir ama ka weyn
  - Dhalinyarada waxa laga wadaa wixii ka yar 18 sano jir
- 2) Guryaha waayeelka ah oo keliya
  - Guryaha waayeelka ah oo keliya ayaa loo oggol yahay dadka jira 55 sano ama ka weyn. Qaar ka mid ah dadka aan aheyn waayeelka ayaa loo oggol yahay inay ku noolaadaan guryaha waayeelka ah, oo ay ka mid yihiin qof la nool oo daryeela dadka waayeelka ah ee ku nool qaybta.
  - Dhalinyarada kuwaas oo ku lug leh si kasta oo ay tahay ba dadka waaweyn ee ku nool qaybta

- Qofka Dhallinyarada, oo ay sabab u yihiin dhacdooyinka aan la filayn, waxay la nool yihiin oo ay daryeelaan qof waayeel ah oo ku jira qaybta guriyeynta waayeelka oo keliya
- Lamaanaha cimri-dheerada ama qof weyn oo isku xiran iskaashato oo ka mid ah qofka dhintay oo hore u deganaa Qaybta

3) Dhismayaal, guryaha iskaashatada, iyo goobaha guryaha guuritaanka ah halkaas oo xayiraadaha da'du ka jirtay KAHOR Janaayo 1, 2018.

Dhismayaal, guryaha iskaashatada, iyo goobaha guryaha guurguura oo ay ka jirtay xadidaada da'da ka hor Janaayo 1, 2018 ayaa loo oggol yahay inay ka saaraan xayiraadda da'da 15 jirka ah. Laga bilaabo 1-Janaayo, 2033, Dhismayaasha, guryaha iskaashatada, iyo guryaha goobaha guurguura waa inay ahaadaan kuwo da'a walba ah guriyeynta ama guryaha waayeelka ah oo kaliya.

## Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta wuxuu ku siin karaa macluumaad bilaash ah oo qarsoodi ah oo ku saabsan Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta iyo sida ay uga caawiso ilaalinta marka aad kireysanayso.

Cabashooyinku waxay ubaahanyihiin in lagu buuxiyo Ingiriisi. Waxaad caawinaad ka heli kartaa shaqaalaha dejinta ama bixiyaha adeegga bulshada. Haddii dhageysiga dacwadaada loogu talagalay cabashadaada, waxaad weydiisan kartaa Guddiga Xuquuqda Aadanaha inuu isticmaalo luqad aan ahayn Ingiriisiga ama uu isticmaalo turjumaan. Waa inaad codsataa turjumaan ka hor dhegeysigaaga.



Si aad ula xiriirto Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta, shabakadan gal



Alberta  
Human Rights Commission

[www.albertahumanrights.ab.ca](http://www.albertahumanrights.ab.ca)

Waxaan jeclaan lahaa inaan u mahad celino haweenka kanadiyaanka Soomaalida iyo ururka caruurta ee nala wadaagaya anaga mashruucan.



"Hagaagoo qaybtaada"

Waa inaad ku tiirsanayn daabacaddaan talobixin sharciyeed. Waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo ku saabsan sharciga Alberta oo keliya.

Daabacaaddani waxay qiraysaa maalgelinta ay bixiso Alberta ee Waxbarashada Xuquuqda Aadanaha iyo Sanduuqa maalgelinta Dhaqamada kala duwan.



Human Rights  
Education and  
Multiculturalism  
Fund

Centre for  
Public  
**cplea**  
Legal Education  
Alberta

[www.cplea.ca](http://www.cplea.ca)

© June 2018, Legal Resource Centre of Alberta Ltd.  
Operating as: Centre for Public Legal Education Alberta